ISKAASHIGA GURIYEENTA BRENT
NIDAAMKA SINAANTA

Agoosto 2003

La Cusboonaysiiyey Noofembar 2005

WAXYAABAHA UU QORAALKA KA KOOBAN YAHAY

HORDHACA uu soo diyaariyey Guddoomiyaha BHP

HORUDHACA

HAWSHA BHP EE NIDAAMKA SINAANTA

MUHIIMADAHA HORE EE BHP

BALLANQAADKA SINAANTA EE BHP

WAA MAXAY GUUSHA ?

SIDA AY BHP U SOO DIYAARISAY NIDAAMKEEDA SINAANTA

NIDAAMKA SINAANTA

- **LIFAAQA 1 – HAWLAHA BHP**
- **LIFAAQA 2 – SANNADKA 1 QORSHAHA TALLAABADA**
- **LIFAAQA 3 – SANNADKA 2 QORSHAHA TALLAABADA**
- **LIFAAQA 4 – DA'DA IYO JINSIYADDA QOFKA EE DEGGANAASHADA BHP**

QORAALKA HORE EE NIDAAMKA SINAANTA EE ISKAASHIGA GURIYEENTA BRENT

HORUDHAC

Farriin ka socota Guddoomiyaha Guddiga Iskaashiga Guriyeenta Brent
Iskaashiga Guriyeenta Brent waxaa ay in muddo ah ay haatan ka shaqaynayeen sidii sinaan loo gaari lahaa, balse waxaynu ogsoonahay in aynu weli ay wax badan inoo dhiman yihiin.

Waxaynu soo dhaweynaynaa fursadda uu siinayo Sharciga Sixitaanka Xiriirka Jinsiyadaha maamulka dadweynaha sidii ay door waxqabad leh uga yeelan lahaayeen horumarinta sinaanta jinsiyadaha. Halkan Brent, oo ka mid ah bulshadaha UK ee aad u kala duwan, waxaynu ballan qaadnay horumarinta sinaanta qof kasta – iyadoo aan loo eegin jinsiyadda, lab/dheddig, naafada, da'da ama ka helitaanka isutagga.

Waxaa muhiim inoo ah in aynu ilaalino islamarkaana aan is aaminaad horumarino iyo in aan taageerno dhammaan bulshadaha Brent ka dhigaya meel fiican oo firfircoon ee lagu noolaado lagana shaqeeyo.

Waxaynu aaminsan nahay in aynu leenahay door muhiim ah ee aan ciyaarayno si loo horumariyo sinaanta shaqaale ahaan iyo adeeg bixiye ahaan. U sinaanta fursadda bulshadeenna iyo shaqaalaheenna waxaa ay tilmaan u tahay hawsha aynu qabanno.

Shaqo badan ayeey qaadatay in aan intan soo gaarno. Waxaynu aaminsan nahay in hawsha horumarinta sinaanta Brent ka jirta in ay noqoto mid joogta ah waana in ay si iskaashi ahaan uga soo qayb galaan dhammaan bulshooyinkeenna. Waxaynu ballan ku qaadnay in aan qaybteenna si buuxda uga soo baxno. Nidaamkeenna Sinaanta waxaa uu tilmaamayaa sida aynu u soo bandhigayno.

Guddoomiyaha Guddiga Iskaashiga Guriyeenta Brent

HORUDHACA
Sharciga Xiriirka Jinsiyadaha (Sixitaanka) 2000 (RRAA) waxaa uu ahaa jawaabta sharci dejiyeyaasha ay ka bixiyeen natiijada Su'aasha Stephen Lawrence. RRA , oo dhaqan gashay Abriil 2001, waxaa ay u xil saartay dhammaan maamulka dadweynaha in ay fiiro gaar ah u yeeshaan baahida :

- Lagu dhammeystirayo kala sooca sharci darrada ah
- Horumarinta sinaanta iyo fursadda
- Horumarinta xiriirka dadka kala ah jinsiyadaha kala duwan

Waxaa jiraan laba waajib gaar ah ee maamul kasta ee dadweyne ay tahay in uu ka buuxiyo waajibaadkan guud. Waxaa ay kala yihiin :

- Diyaarinta iyo daabacaadda Nidaamka Sinaanta Jinsiyadda (RES)
- Kormeerka hawlaha iyo nidaamka shaqaaleynta maamulka

Iskaashiga Guriyeenta Brent (BHP) ma aha maamul dadweyne sida lagu qeexay RRAA, sidaa awadeed sharciyan qasab kuma aha in la soo saaro Nidaamka Sinaanta Jinsiyadda.

Hase ahaatee, BHP waxaa ay tixgelinaysaa in ay faa'ido leedahay in la diyaariyo nidaamkani oo ay ujeeddadiisu tahay horumarinta sinaanta. BHP waxaa ay go'aansatay in nidaamkeeda uu kaafinayo horumarinta dhammaan arrimaha sinaanata, intii uu xoogga saari lahaa oo kaliya arrimaha sinaanta sida uu doonayo RRAA. Qaabkan ballaaran ee lagu horumarinayo sinaanta waxaa uu tilmaamayaa sida ay maamulka dadweynaha ay u buuxiyeen waajibaadkooda sida ku cad RRAA marka ay diyaarinayaan Nidaamka Sinaanta Jinsiga.

Guddiga Sinaanta Jinsiga, Guddiga u Sinaanta Fursadaha, Guddiga Xuquuqda Naafada, Hay'adda Shaqooyinka ee dawladda hoose iyadoo uu saacidayo Guddiga Baaritaanka waxaa ay ka wada shaqeeyeen in ay soo saaraan Nidaamka Sinaanta ee dawladda hoose kaasoo ah qaab guud ee wax looga qabanayo sinaanta jinsiga, lab/dheddig iyo naafada. BHP waxaa ay ku hawlan tahay raacitaanka tilmaamaha lagu qeexay Nidaamka Sinaanta.

HAWSHA BHP EE NIDAAMKA SINAANTA
BHP waa Hay'ad Maamulka Dherer Gacmeedka (ALMO) ee la aasaasay Oktoobar 2002. Waxaa ay maamulaan hanti gaaraysa 10,000 iyagoo ka wakiil ah Golaha Brent waxaana adeegyo siiyaan in ka badan 3000 saxiixeyaasha heshiiska ee guryahooda ku gatay sharciga Xaq u Yeelashada Iibsashada.

Tirakoobka 2001 waxaa uu xaqiijinayaa kala duwanaanta dadweynaha Brent ; Brent waxaa ay qabaan 54.7% Madow iyo jinsiyadaha laga badan yahay, marka loo eego tirada dhexdhexaadka ah ee England iyo Wales. 1 qayb maamuleed oo kaliya ayaa kaga badan kala duwanaanta dadweynaha. Dadweynaha caddaanka ee Brent ku nool waxaa ku jira bulshooyinka Irish iyo Ingiriiska & Wales (6.9% marka la barbar dhigo tirada dhexdhexaadka ee qaranka ee ah 1.2%). 8.4% ee dadweynaha Brent waxaa ay ku dhasheen bulshoweynta Yurub marka laga saaro UK iyo Ireland, haddii la barbardhigo qiyaasta dhexdhexaadka ah ee qaranka ee 2.3%, iyo Brent waxaa ay qabaan qaybta ugu badan ee degganeyaasha ku dhashay dibedda Bulshoweynta Yurub oo ah 38.2% marka loo barbardhigo 6.6% oo qaranka ah.

BHP waxaa ka shaqeeya qiyaastii 180 shaqaale kuwaasoo 60% dumar ah iyo 40% rag ah, 68% oo madow iyo jinsiyadaha laga badan yahay ah iyo 30% oo caddaan ah.

MUHIIMADAHA HORE EE BHP

Muhiimadaha hore ee BHP waxaa ay barbar socotaa bartilmaameedyada Dawladda ee ah in aynu gaarno. Ugu horreyntii iyo muhiimadda ugu weyn waa in guryaheenna oo idil laga dhigo qaabka hufnaanta ee Dawladda.

Muhiimadaha-yaga ee kale waxaa ay kala yihiin :

- Soo aruurinta 96.75 kirada aynu dadka ku leenahay
- Dhimista wakhtiga ay inaga qaadanayso dib u kireynta hantida u baahan dayactir yar oo la gaarsiiyo 30 cishood.
- Dhimitaanka khasaarada kirada hantideenna oo aynu dadka ku leenahay oo aysan dhaafin 1.1%
- Dhammeystirka 99% dhammaan dayactirka taagan oo idil muddada bartilmaameedka ay dawladda dajisay.
- Xajinta qiyaasta dhexdhexaadka ee tirada maalmaha lagu dhammeystiro dayactirka aan degdegga ahay in ka yar 10 maalmood (bartilmaameedka dawladda waa 11 cishood)
- Kordhinta 85% heerka ku qanacsanaanta guud ee adeegyadeenna degganeyaasha si loo xaqiijiyo in degganeyaasheenna madowga iyo jinsiyadaha yar aysan qanacsanaantoodu ka yareen marka loo eego degganeyaasha caddaanka ah.
- Gaaritaanka bartilmaameedyada Dawladda ee sinaanta guud ahaan iyo gaar ahaan wax ka qabadka dhibaateynta
- Kordhinta 95% tirada dayactirka wax ka qabadka ee ballanta loo qabtay lana dhawray.

Waxaynu isticmaali doonaa macluumaadka soo aruurinta iyo qaababka kormeerka, iyadoo aan u kaashanayno qaababka kale waxaynu qorshaynaynaa in aan adeegsano tilmaanta Nidaamka Sinaanta hoose si loo xaqiijiyo in siyaalaha aynu u gaarno muhiimadaha aysan si kale u saameynin fursadaha ay helayaan koox gaa' ah marka loo barbar dhigo kuwo kale.

BALLANQAADKA SINAANTA EE BHP

BHP waxaa ay sameysatay warbixinta qaab hawleed u gaar ah (EOP) ee sinaanta oo tilmaamaysa doorkeeda adeeg bixiye ahaan, shaqaale iyo hoggaamiyaha ra'yiga dadweynaha deegaanka. Waxaa ay tani xusaysaa :

"BHP waxaa ay ballan qaadaysaa xaqiijinta in adeegyada aynu bixinno ay u dhigmaan baahida dhammaan qaybaha bulshada ka tirasan iyo in shaqaalaheena ay tilmaan ka yihiin dadweynaha aynu u adeegno."

EOP waxaa ay ku ballaarinayaan aasaaska ballantan iyagoo xusaya:

- Waa in aynu xaqiijinno in qof waliba uu si siman u helaayo adeegyadeenna
- Waxaynu ognahay in adeegyadeenna ay tahay in ay noqoto mid jirta, waxqabad iyo xasaasi ah

- Hadafkeennu waa xaqiijinta in qandaraasleyaasheenna iyo dadka kale ee bixiya adeegyadeenna ay sidoo kale inagala mid yihiin aragtideenna iyo waxyaabaha aynu qiimeyno
- Waxaynu shaqaaleynaynaa, horumarinaynaa islamarkaana aan ceshanaynaa dadka kuwa ugu shaqada fiican iyadoo aynu qiimaynayno xirfadaha kala duwan iyo waayo aragnimada ay ku soo biirinayaan BHP... iyo dhiirigelinta dhaqan daacad ah ee furan kaasoo qiimaynaya kala duwanaanta-yada, iyo
- Waxaynu ogsoonahay muhiimadda doorka hoggaanka ee aan ku horumarinayno kuna dhiirigelinayno dul qaadashada, caddaaladda iyo sinaanta.

Ballantani waxaa dheer, Golaha Brent oo ay BHP qandaraas kula jirto si ay u bixiso adeegyada maamulka guriyeenta waxaana jira waajibaadka wax qabadka sinaanta BHP ee ah in ay ka soo baxdo. Waajibaadkani waxaa ka mid ah :

- Tixgelinta saameynta sinaanta dhammaan hawsha BHP marka la horumarinayo qaab hawleedka, la dhaqan gelinayo iyo kormeerka waxtarkooda.
- Matalaadda bulshada deegaanka heer Guddi iyo shaqaaleeye ahaan
- Qiimeynta qanacsanaanta degganaha iyo ka qayb qaadashada jinsiyadda, lab/dheddig iyo wax ka qabadka meelaha aan lagu qanacsanayn ee muhiimka ah.
- Qayb ka qaadashada hawlaha hay'adaha kala duwan ee Brent, tusaale ahaan Dhimista falalka dambiyada iyo arrimaha bey'adda

Sanadkii 2003, BHP waxaa ay guddi u saartay dib u eegista waxqabadkeeda xagga arrimaha sinaanta. Dib u eegistu waxaa ay soo saartay in BHP ay ku fiican tahay hawlaha gaarsiinta adeegga iyo shaqaaleynta. Sidoo kale waxaa ay ifisay meelo qaar ah ee horumarin u baahan. Meelahan ee muhiimadda hore u leh horumarinta waxaa lagu daray Qorshaha Tallaabada ee ku lifaaqan Nidaamkani ee Sinaanta.

WAA MAXAY GUUSHA ?

Aad ayeey muhiim u tahay aqoonsiga waxa aynu doonayno in aan ka gaarno horumarinta Nidaamka Sinaanta. Waxaynu ogsoonahay in mararka qaarkood marka la guda galayo hawshani dhibka badan ay fududahay in aragtida lala waayo natiijada dambe iyadoo xoogga la saarayo hawsha oo kaliya . BHP waxaa ay tixgelinaysaa in ay raaciso :

- Dhammaan dadka isticmaala adeegyada, shaqaalaha dalbada iyo kuwa muhiimadda siinaya ee dareensan in si aan caddaalad iyo sinaan lahayn loola dhaqmay.
- Kalsooni la horumariyey iyo aaminaadda dhammaan dadweynaha iyo bulshooyinka Brent ee BHP.
- Awoodda lagu muujinayo in aan hoggaan u noqonay hay'ado kale ee ay wada shaqeynta inaga dhaxeyso si aynu u horumarino qaddarintooda xagga arrimaha kala duwanaanta.

Waxaynu u baahanaynaa awoodda aan ku muujinayno in aan horumar ka gaarnay cabbirka guusha. Waxaynu tixgelinaynaa in caddaymaha guusha ay ka mid ahaanayaan :

1. Caddayn muuqata ee daraasadda, la tashiga iyo ashtakadaha ay shaqeynayaan:
   - Dhammaan dadka isticmaala adeegyada, shaqaalaha, dalbadeyaasha iyo kuwa muhiimadda siinaya ee dareensan in si aan caddaalad iyo sinaan lahayn loola dhaqmay.
   - Kalsooni iyo aaminaadda dhammaan dadweynaha iyo bulshooyinka Brent ee BHP oo korodhay

2. Matalaadda haweenka, dadka naafada ah, madowga iyo jinsiyadaha laga badan yahay oo heer kasta ka kordhi doonta hay'adda, si BHP ay u noqoto meel laga dhex arki karo bulshooyinka ay u adeegto.

3. Waxaynu baadigoobaynaa in aynu xaqiijinno in hay'adaha kale ee aynu wada shaqeynta la leenahay ay qaateen ujeeddooyin la nooc ah marka ay noqoto sinaanta islamarkaana ay dhaqangeliyeen.

SIDA AY BHP U SOO DIYAARISAY NIDAAMKEEDA SINAANTA

BHP waxaa ay ka tilmaan qaateen Guddiga Sinaanta Jinsiga iyo kuwo kale wax qabadka fiican ee lagu dajinayo Nidaamkeeda Sinaanta.

Marka hore, shaqaalaha hore loo qoray waxaa ay dhammeystireen is-qiimeynta taasoo lagu aqoonsanayo sida qaab hawleedka iyo wax-qabadka BHP ay u saameysay kooxaha kala duwan iyo shakhsiyaadka bulshada ka tirsan. Qiimeyntani hore waxaa ku jiray tixgelinta haddii wax-qabadka ma qaab hawleedka taagan ay tahay in baabi'iso kala sooca caddaalad darrada; horumarinta u sinaanta fursadaha ; iyo/ama horumarinta xiriirka fiican ee jinsiyadaha.

Sidoo kale waxaa ay shaqaalaha hore dib u eegeen haddii ay jirto kala duwanaanta dadka (tusaale ahaan madow iyo jinsiyadaha laga badan yahay; dumarka; dadka naafada ah; waayeelka ; dhallinyarada ; ragga isutaga iyo haweenka isutaga) oo ay si kala duwan u saameysay gaarsiinta hawl ama qaab hawleed gaar ah.

Qiimeyntooda waxaa ay tixgelisay haddii BHP ay haatan haystaan macluumaad ka kooban isticmaaleyaasha adeegga ee hawsha ama qaab hawleedka.

Tallaabada xigta ayaa ahayd in go'aan laga gaaro haddii ay jiraan caddaymo ama sabab lagu fakaro in qaab hawleedka ama hawlaha ay si caddaalad darro leh dadka u kala soocaan. Halkani waxaa ay shaqaalaha eegayeen haddii ay jiraan caddaymo soo bandhigaya natiijado u kala duwan kooxaha. Miyuu jiray caddayn dadweynaha ay xiiseeyaan (daraasado, ashtakooyin, kormeerka gaarsiinta adeegga) in ay jiraan in si aad ah ay natiijada ugu kala duwan tahay kooxaha dadweynaha qaarkood.

Ugu dambeystii, hawsha is-qiimeynta waxaa ay baadigoobaysay muhiimadaha hore ee tallaabo qaadista. Muhiimadahani hore waxaa lagu qeexay Qorshooyinka Tallaabada ee sannad walba.

Qoraalka hore ee Qorshaha Tallaabada Nidaamka Sinaanta ayaa aad loo qaybiyey si faallo looga helo kooxaha bulshada, degganeyaasha iyo kuwa halkaa ku nool. Dukumeentiga kama dambeysta ah waxaa shaqaalaha BHP ay ku

haystaan bogga internetka gudaha si ay uga faalloodaan, iyo weliba bogga internetka ee dibedda. Horumarka laga gaaro nidaamka ayaa si joogta ah ay u eegaan gole hoosaadka Sinaanta iyo Kala Duwanaanta ee BHP.

NIDAAMKA SINAANTA

Sharciga Xiriirka Jinsiyadaha (Sixitaanka) waxaa uu waajibinayaa in Nidaamka Sinaanta Jinsiyadaha uu :

- Caddeeyo hawlaha iyo qaab hawleedka maamulka ay ku qiimeeyeen in ay la socoto hawsha lagu horumarinayo sinaanta jinsiyada ; iyo
- Lagu qorsheeyey in hawsha la dhammeystiro inta ka horreysa:
  - Qaab hawleedka oo laga kormeero saameynta kale ay ku yeelan karto sinaanta jinsiyada.
  - Qiimeynta iyo kala talinta saameynta suuragalka ah ay ku yeelan karaan qaab hawleedyada la soo jeediyey
  - Daabacaadda natiijadaha qiimeyntooda, wada tashiga iyo kormeerka
  - Xaqiijinta in dadweynuhu ay heli karayaa macluumaadka iyo adeegyada
  - U tababaridda hawlaha guud e shaqaalaha

Waxaynu tani u adeegsanay saldhigga Nidaamka Sinaanta. Sidoo kale waxaynu ka sare marnay tilmaantani mar ama laba goor. (Waxaad tifaftirka ka eegtaa ‘Ballanqaadyada Dheeraadka’ hoose).

Hawlaha

Waxaynu qeexnay sida aan go’aan uga gaarnay hawlaha yaga ee aynu ku fikirnay in ay la barbar socoto waajibaadka horumarinta sinaanta ee qaybtii hore ee 'Sida ay BHP u soo Diyaariyeen Nidaamka Sinaanta’. Lifaaqa Kow waxaa ku yaal liiska hawlaha oo dhammeystiran.

Kormeerka lagu qiimeynayo waxyeellada ka soo horjeeda

BHP waxaa ay aruuriyaan macluumaadka naafada, asalka jinsiyadda iyo noocyada lab/dheddig ee dhammaan qoysaska halkan la soo dejiyo. Sidoo kale waxaynu macluumaadkani u aruurinaa siyaalo kale, tusaale ahaan marka aynu daraasad sameynayno, waxaynu ka codsanaa degganeyaasha in ay buuxiyaan foomka qanacsanaanta iyo marka ay dadka ashatakada soo gudbinayaan. Waxaynu macluumaadkan u isticmaalnaa si aan u eegno qaabka aan wax u sameyno ay waxyeello ka soo horjeeda ku yeelanayso koox degganeyaasha ka tirsan marka la barbar dhigo koox kale.

Wakhti xaadirka kama haysano macluumaadkan dhammaan degganeyaasha iyo saxiixeyaasha heshiiska balse sida ugu dhakhsiyaha badan ayaan u qorshaynaynaa in aan u helno. Marka aan helno, waxaa ay macnaheedu tahay in marka aynu qiimeynayno saxyeellada suuragalka ah ee qaab hawleed cusub, waxaynu awood u helaynaa in aan u sameyno qaab guud.

BHP waxaa ay sidoo kale ay siyaalo kale u qiimeysaa waxyeellada qaab hawleedkeeda xaadirka ah. Si dhab ah ayeeynu u qaadanaa ashtakooyinka degganeyaasha. Haddii baaritaanadeenna ay muujiyaan in ashtakada cudur daar leedahay, waxaynu beddelaynaa hawl ama qaab hawleed kasta haddii loo baahdo si aysan mustaqbalka waxyeello gaarsiin degganeyaasha kale.

Sidoo kale waxaynu baadigoobaynaa aragtida degganeyaasheenna goorta aynu qorshaynayno in aan soo saarno qaab hawleedka cusub iyo waxyeellada qaab hawleedyada haatan taagan. Waxaynu u marnaa Guddiga Latalinta Degganeyasha, Guddiga Guriyeenta Deegaanka, degganeyaasha iyo ururrada degganeyaasha iyo guddiga khabiirada degganeyaasha oo aynu sameynay. Waxaynu sii wadaynaa in aan kuwani isticmaalno si loo xaqiijiyo in qaab hawleedyada xaadirka iyo mustaqbalka ay yihiin kuwo dadka oo idil caddaalad u ah.

Intaa waxaa dheer, waxaynu baadigoobaynaa aragtida kooxaha bulshada, dugsiyada, hay'adaha caafimaadka, Booliska iyo kuwo kale si ay inooga saacidan qiimeynta waxyeellada suuragalka ah ay gaysan karto tallabo cusub iyo kormeerka waxyeellada hawlaheenna waqti xaadirka. Waxaynu aaminsan nahay in tani ay inagu biirinayso ra'yi dheeraad ah ee ka anfacaya BHP ahmiyadeeda ay ku horumarinayso sinaanta. Waxaynu isku duba ridaynaa liis ballaaran ee aan dhammaan kooxahani iyo hay'adaha wax ugu dirayno si ay inooga saaciddo hawsha wada tashiga.

BHP shaqaaleeye ahaan

Shaqaaleynta ayaa ah mid ka mid ah hawlaheenna Nidaamka Sinaanta. Sharciga Sixitaanka Xiriirka Jinsiyada waxaa uu si tifaftiran u qeexayaa waajibaadka saaran shaqaaleeyaha cabbirkeenna leh. Kuwani ayaa ah soo aruurinta iyo kormeerka macluumaadka asalka jinsiyadda laga badan yahay ee shaqooyinkeenna dalab u soo gudbista, cidda qaadanaysa iyo sida loogula dhaqmo shaqaale ahaan.

Intani badankood waa aynu sameynaa. Sidoo kale waxaan soo aruurinaa oo aan kormeernaa macluumaadka ku saabsan naafada iyo nooca lab/dheddig, iyo weliba asalka jinsiyadda. Lifaaqa Seddex shaqaalaha ayuu si tifaftiran ugu qeexayaa xilligii aynu diyaarinay Nidaamka Sinaanta. Waxaynu qorshaynaynaa in aan soo aruurino islamarkaana aan kormeerno macluumaadka ku saabsan da'da iyo weliba maadaama aynu ognahay in ay tani waxyeello ku yeelan karto sida kuwa wax dalbanaya iyo shaqaalaha loola dhaqmo.

Waxaynu sii wadaynaa in aan warbixin u gudbinno gole hoosaadka Sinaanta BHP iyo Guddiga natiijooyinka kormeerkeenna. Waxaynu isticmaali doonaa natiijada Aftida 2001 si aan u tilmaanno bartilmaameedyada hore ee aan ka qiimeynayno hawlaheenna. Waxaynu iftiiminaynaa halka macluumaadka ay tilmaamayso in ay tahay in aan wax dheeraad ah ka qabanno si aan u horumarino sinaanta shaqaaleeye ahaan. Tusaale ahaan, waxaynu ognahay in dad yar oo naafo ah ay shaqooyinkeenna dalab u soo gudbiyaan sidaa awadeed waxaynu eegaynaa siyaalo aan ku dhiirigelinayno in ay tani u suuragasho.
Intaa waxaa dheer, waxaynu sii wadaynaa in aan horumarino tallaabooyinka aynu qaadnay si aan u noqonno shaqaaleeyaha la xusho islamarkaana aan soo bandhigayno shuruudo aad u fiican ee la bed-beddeli karo.

Qorshooyinka wada tashiga

BHP waxaa ay adeegsadaan qaabab dhowr ah ay wada tashi ula yeelanayaan shaqaalaha, degganeyaasha iyo dadka halkaa ku nool. Qaybta sare ee kormeerka tiro dhowr ah ayaa lagu soo qaaday. Intaa waxaa dheer iyadoo aan baadigoobayno aragtida degganeyaasha iyo dadka halkaa ku nool inagoo

adeegsanayno wargeysyada joogtada ah, kulannada iyo daraasadaha joogtada ah. Sidoo kale waxaynu sameynay guddiyo qaas ah oo ka kooban naafada, dumarka iyo degganeyaasha madowga iyo kuwa laga badan yahay.

Waxaynu isku dayaynaa in aynu xaqiijinno in aan macluumaadka u bixinno qaab dadka ay si fudud u fahmi karaan. Waxaynu adeegsan doonaa qaababkani si aan wada tashi ugala yeelano degganeyaasha iyo dadka halkaa ku nool Nidaamka Sinaanta iyo marka aynu sameynayno dib u eegista aan ku qiimeynayno waxa aan ka qabanay horumarinta sinaanta iyo waxa dheeraadka ah ee loo baahan yahay in la sameeyo.

Waxaynu ognahay in kooxaha degganeyaasheenna qaarkooda, tusaale ahaan dhallinyarada, ay matalaaddooda aad ugu hooseyso qorshooyinkeenna wada tashiga xaadirka ah. Waxaynu eegaynaa qaabab aan dad dheeraad ah ee ka tirsan kooxaha matalaaddoodu yar tahay ku dhiirigelinayno in ay codkooda la baxaan si uu wada tashigeennu u ahaado mid ballaaran. Hal si aan sidani ku sameynayn doonno ayaa ah in aan wada tashi la yeelano kooxaha bulshada iyo kooxaha aan ku soo tilmaanay qaybta sare ee kormeerka.

Natiijada kormeerka hawsheenna horumarinta sinaanta

BHP waxaa ay waqti xaadirka u xayeesiisaa hawsheeda noocyo kala duwan. Waxaa ka mid ah macluumaad lagu qoro bogga internetka-yaga, wargeysyadeenna, qoraallo jaraa'dka lagu soo qoro, waraaqo la qaybiyo, boostarro iyo kulannada degganaha iyo dadka halkaa ku nool.

Waxaynu sii wadaynaa in aan isticmaalno qaababkani ee aan ku xayeesiinno natiijada hawsheenna lagu horumarinayo sinaanta. Sidoo kale waxaynu wada shaqeyn la yeelan doonaa kooxaha bulshada deegaanka si ay inooga saacidaan xayeesiinta hawsheenna si ay degganeyaal dheeraad ah ee Brent ku nool ay u maqlaan waxa aynu qabanayno.

Qorshaha Tallaabada Nidaamka Sinaanta waxaa uu soconayey muddo seddex sano ah, laga soo billaabo Sebtembar 2003. Mid kasta ee seddexda sano ka tirsan, qorshe waxqabad tifaftiran ayaa la dhaqangeliyey waxaana horumarka qorshooyinka waxqabadka si joogta ah loogu gudbiyaa gole hoosaadka BHP ee Sinaanta iyo Kala Duwanaanta.

Horumarka qorshaha Waxqabadka Sanadka 1 waxaa uu ku yaal Lifaaqa 2. Horumarka sanadka 1 waxaa xaqiijiyey qiimeyn madax bannaan ay sameeyeen Nidaam Hawleedka Tayada Guriyeenta , kuwaasoo soo ku soo gabagabeeyey in horumar lixaad leh laga gaaray gaaritaanka qaar badan ee ka tirsan dhibcooyinka lagu xusay Qorshaha Tallaabada Nidaamka Sinaanta, iyo in shaqaalaha BHP iyo maamuleyaasha ay tahay in ay sheegtaan horumarka la gaaray sanadka 1. Dhibcooyinka u baahan tallaabo dheeraad ah ee ku cad warbixinta HQN ayaa masna warbixintooda loo gudbiyey gole hoosaadka E&D kuwaasoo tallaabo lagu dabagalayo sameeyey. Waxaa kuwani ka mid ahaa dhismaha qaabka guud ee Qiimeynta Waxyeellada Sinaanta, taasoo dhalisay in HQN loo xilsaaray in ay wada shaqeyn la yeeshaan BHP si loo soo dhiso qaabka guud iyo tababarka maamuleyaasha muhiimka ah ee BHP Diseembar 2004.

Qorshaha waxqabadka Sannadka 2 waxaa uu ku yaal lifaaqa 3. Warbixinta horumarka ayaa loo gudbinayaa Maarso 2006 gole hoosaadka E&D, iyadoo uu la socdo tifaftirka lagu heshiiyey waxqabadka Sanadka 3.

Illaa iyo hadda, guusha weyn ee Nidaamka Sinaanta ayaa ah kordhinta is barbardhigga degganeyaasha BHP xagga da'da, jinsiyadda iyo nooca lab/dheddig ee la yaqaan. Macluumaadkani ayaa muhiim u ah kormeerka adeegyada iyo xaqiijinta caddaalada marka adeegyada la qabanayo. Warbixinta 2003 ee Qiimaha Ugu Fiican ee BHP waxaa ay tilmaantay in BHP ay kordhisay is barbardhigga degganeyaasha oo jinsiyaddooda diiwan gashan halka ay hore uga ahaan jirta eber oo noqotay 44% seddex sano gudahooda, iyadoo bartilmaameed 70% in la gaaro la sameeyey. Noofembar 2005, BHP waxaa ay ka sare mareen bartilmaameedka, iyagoo helay macluumaadka jinsiyadda degganeyaasha 91%, iyo helitaanka macluumaadka jinsiyadda, da'da 89% ee dhammaan degganeyaasha. Jadwal da'da iyo jinsiyadda degganeyaasha BHP soo koobaya (qaybaha Aftida 2001) ayaa ku lifaaqan Lifaaqa 4.

Xaqiijinta in dadweynuhu ay heli karayaan macluumaadka iyo adeegyada
Degganeyaasha BHP waxaa ay ku kala hadlaan luqado kala duwan. Qaar ka tirsan degganeyaasheenna dhegaha ama indhaha ayeey la' yihiin. Degganeyaal kale ayaa ka itaal daran waxbarashada. Degganeyaasheenna badankooda ayaa suuragal ah in ay dhaqdhaqaaqoodu uu yar yahay. Dhammaan waxyaabahani ayaa saameynaya awoodda degganeyaasheenna ay ku helayaan macluumaadka iyo adeegyada-yada. BHP gudaheedu waynu ka ogsoon nahay arrintani waxaana aan qaadanay tallaabooyin aan ku horumarinayno helitaanka yaga.

Shaqaalaheenna badankooda waxaa ay si fiican ugu hadlaan luqado dhowr ah iyo mararka qaarkooda waxaa ay noqon karaan turjubaanno. Waxaynu turjunay qaar ka mid ah dukumeentiyo muhiim ah iyadoo aan u kala turjunay toddobada luqadood ugu muhiimsan ee ay bulshada Brent ku hadlaan. Sidoo kale waxaynu isticmaalnaa adeegyada turjumidda taleefanka marka aan turjubaan uusan joogin. Waxaynu isticmaalnaa TypeTalk waxaana aan qabnaa adeegga minicom ee loogu talagalay dadka dhegaha la'. Waxaynu macluumaadka ku haynaa cajalad, daabacaad weyn ee loogu talagalay indhoolka (Braille) markii la codsado. Sidoo kale waxaynu qorshayn karnaa in uu xaadir ahaado saxiixaha BSL, haddii la helo ogeysiis laba cishood ah, waa haddii loo baahdo. Xafiisyadeenna Guriyeenta waxa ay dhammaantooda ay u dhisan yihiin qaab u fududeynaya dadka dhaqdhaqaaqa ka itaal darran in ay isticmaalaan. Waxaynu qorshaynaynaa in sanadka soo socda ay dhamman dhismooyinkeenna u furan dadweynaha la isticmaali karo, taasoo waafaqsan waajibaadkeenna Sharciga Takoorka Naafada, 1995.

Sidaa awadeed waxaynu aaminsan nahay in aan badanaa waafaqsan nahay qaybta shuruudaha Nidaamka Sinaanta. Si xasilloon ayeeynu u kormeeri doonaa iyadoo aan la tashan doono degganeyaasheenna si loo xaqiijiiyo in aynu adkeyno heerkani – iyo in aan ka horumarino meesha aynu awoodno.

Tababarka shaqaalaha
Aad ayaan ugu dadaalnaa in aynu shaqaaleyno shaqaale inagala mid ah ballanqaadka BHP ee lagu horumarinayo sinaanta. Sidoo kale waxaynu ogsoonahay in shaqaalaha yaga si fiican loo tababaraa si ballanqaadyadani loo dhaqangeliyo. Sidaa awadeed waxaynu dhaqangelinaynaa barnaamijyo dhowr ah ee shaqaalaha u micnaynaya waxa ay tahay in ay sameeyaan si ay u dhaqangeliyaan waajibka Nidaamka Sinaanta ee lagu sinaanta lagu horumarinayo. Waxaa kuwani ka mid ah tababarkii Dayrta 2003 ee loogu adeegayo macaamiisha naafada ah, oo lagu guulaystay in ay 90% shaqaalaha

ay dhammeystiraan. Tababar ayaa loo qorsheeyey xubnaha guddiga Diseembar 2005 iyo shaqaalaha oo idil Maarso 2006. Tababar ayaa sidoo kale loo fidinayaa qandaraasleyaasha iyadoo loo marayo barnaamijka tababarka Daryeelka Macaamilka. Intaa waxaa dheer, barnaamijyo qaas ah ee la xiriira hawl ama qaab hawleed gaar ah kuwaasoo tixraacaya waajibka lagu horumarinayo sinaanta. Tusaalooyin qaar ah ayaa ka mid ah wax ka qabadka dhibaateynta, xallinta murannada deriska iyo daryeelka macaamilka waxtarka leh.

Sidoo kale waxaynu qorshaynaynaa in aan qabanno dib u eegis guud ee fursadaha tababaridda u furan shaqaalaha. Dib u eegista ayaa waxaa lagu eegayaa sida shaqaalaha ay u ogaan lahaayeen fursadaha tababarka, sida ay u fududayd tababarka ay u baahan yihiin in ay helaan iyo ra'yigooda xagga waxtarka tababarka. Waxaa ay tani dhacaysaa Sanadka Seddex ee Nidaamka Sinaanta.

Faallooyin Dheeraad ah :

Hawsha iskaashiga
Ballanqaadkeena xagga fursadaha loo siman yahay ayaa ifinaya muhiimadda aynu siinayno in aan si tusaale mudan aan wax u hoggaamino. Sidaa awadeed waxaynu baadigoobaynaa in aan horumarino dadaalkeenna xagga sinaanta hawlaha ay inagala dhaxeyso hay 'adaha kale.

Si iskaashi leh ayaan ula shaqeeynaa dhawr hay’ado dawladeed iyo kuwo aan dawli ahayn ee iskaa wax u qabso. Waxaa ka mid ah adeegga caafimaadka, booliska, waaxyada Golaha Brent, hay’adaha latalinta iyo kooxaha bulshada. Waxaan dadaalkani u dhisnay in aan ku horumarino sinaanta hawlaha aan hay'adaha kale la kaashano. Waxaynu doonaynaa in aan sidani ka xaqiijinno dhammaan hay’adaha iskaashiga ay nagala dhaxeyso iyo in aan horumarka kormeerno.

Sameynta qandaraaska
Sidoo kale waxaynu doonaynaa in aan dadaalkeena aan ku horumarinayno sinaanta aan raacino marka aan shirkad aan wax ka iibsano qandaraas la gelayno. Hawsheenna BHP badankeeda waxaa inoo qabtaan qandaraasleyaal dibedda inaga ah. Waxaa ay kala yihiin hawlaha dhismooyinka waaweyn iyo xisaab hubinta iyo macluumaadka xisaabaadka.

Illaa iyo heer ayaan haatan sameynaa. Tusaale ahaan, qandaraasleyaasheenna waaweyn waa in ay inoo keenaan koobiga qorshe hawleedkooda fursadaha loo siman yahay inta aan loo fisixin in helitaanka hawsha ay u tartamaan. Waxaynu tani si tifaftiran u eegaynaa Sanadka Laba ee Nidaamka Sinaanta marka aynu dib u eegayno qorshaheenna alaab/adeeg iibsashada.

Maamulka
Guddi ayaa BHP maamula. Waxaa uu ka kooban yahay magacaabaneyaasha Golaha Brent, wakiilada degganeyaasha iyo dadka halkaa ku nool iyo xubno madax banaan. Waqti xaadirka waxaa jira 16 jago ee xubno Guddi. 11 kuwani ka mid ah waa rag iyadoo shan ay dumar yihiin. Lix waa madow iyo dadka laga badan yahay.

Guddiga BHP waxaa uu qabaa 18 kuraas. Lix waa magacaabaneyaasha Golaha Brent, lix waa wakiilada degganeyaasha iyo dadka halkaa ku nool iyadoo lix ay yihiin xubno madax banaan. Waxaa uu Golaha u magacaabaya goleyaasha si u dhiganta muuqalka siyaasadeed ee Golaha. Guddiga Guriyeenta Deegaanka waxaa ay magacaabaan 6 ah wakiillada degganeyaasha iyo dadka halkaa ku nool. Xubnaha madaxa banaan waxaa loo soo xushaa kaddib marka wargeyska deegaanka lagu soo xayeesiiyo iyo iyadoo lala xiriiro hay' adaha deegaanka.

Waqti xaadirka dumarka iyo madowga iyo dadka laga badan yahay tiradoodu waa ay ku hooseysaa Guddiga. Waxaynu damacsan nahay in Guddiga uu matalo bulshada deegaanka 2-3 sano ee soo socda.

Guddiga waa xubinta ee ka mas' uulka ah wax kasta ee ku yimaada magaca BHP. Illaa iyo xad ayaan xaqiijinay in Guddiga uu tixgeliyo dhismaha gole hoosaadka Sinaanta ee waajibka lagu horumarinayo sinaanta Sidoo kale waxaynu xaqiijin doonaa in Guddiga uuhelaa warbixinno joogta ah xagga horumarka dhaqangelinta Nidaamka Sinaanta yada iyo in xubnaha Guddiga si munaasib leh loo tababaro. Intaa waxaa dheer oo aan xaqiijinaynaa in xeeladdeena guud iyo qorsheyaahsa ganacsiga ay si caddaan ah u tixraacayaan dadaalka aan ku horumarinayno sinaanta. Shaqada Guddiga waxaa ay ku taal Sanadka Labaad ee Nidaamka Sinaanta.

LIFAAQ 1

HAWLAHA BHP

Waxaynu hoos ku qornay hawlaha BHP ee barbar socda waajibka lagu horumarinay sinaanta, kuwaasoo loo qaybiyey sanadka hawsha dib loo eegi doono:

Sanadka 1
Dayactir
Xaq u yeelashada iibsashada
Khayraadka aadanaha
Maamulka xiriirka deriska
Maamulka Degganaha
Xiriirinta
Alaab/Adeeg gaarsiin

Sanadka 2
Ka qayb qaadashada degganaha
Guddiga – xeeladda & qorshe hawleedka
Adeegga Macaamilka
Adeegyada hantida
Adeegga nadaafadda dhismaha Brent
Adeegyada saxiixeyaasha heshiiska

Sanadka 3
Dib u soo celinta kirada
Horumarinta maamulka
IT
Horumarinta iyo waxbarashada
Ashtakooyinka
Hawlaha waaweyn